



## Haweenaydu uma safari karto meel loo socdo habeen iyo maalin hadii aanu la socon ninkeedu ama nin maxramkeeda

Abii Saciid Alkhudri -Allaha ka raali ahaadee- wuxuu la duulay Nabiga scw laba iyo toban duulaan -wuxuu yiri: Nabigaan -naxariis iyo nabadi korkiisa ah ahaatee- waxaan ka maqlay afar aan jeclaaday, wuxuu yiri: "Haweenaydu uma safari karto meel loo socdo habeen iyo maalin hadii aanu la socon ninkeedu ama nin maxramkeeda, mana soomayso labada maalmood ee ciidul fidriga iyo ciidul adxa, salaada subaxa ka dibna salaad lama ogola ilaa qoraxdu soo baxdo, salaada casarna ka dibna lama ogola salaad ilaa ay qoraxdu dhacdo, sadex masaajid waxan ahayna looma safri karo: masjidka xaramka, masjidka Alaqsaa, masjidkayga kan ah."

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu wxuu reebay -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahatee- afar arimood: Mida 1aad: haweenayda oo loo ogola inay safarto meel labo maalin loo socdo iyadoo aanay la socon ninkeeda ama nin maxaarimteeda ka mida ee ka mida qaraabadedda aanay waligood is guursan karin, sida Wiilkeeda, Aabbeheed, Wiilka walaalkeed dhalay, Wiilka walaasheed dhashay, adeerkeed, abtigeed, iyo inta la midka ah. mida 2aad: waxaa la reebay soonka maalinta ciidul fidriga iyo ciidul adxa, waa isku mid haduu Muslimku u soomo nidar ama suno ama kafaara gud. mida 3aad: la ma tukan karo salaado suno ah salaada casar ka dib ilaa ay qoraxdu dhacdo, marka fajarku soo boxo ka dibna la ma tukan karo ilaa ay soo baxdo qoraxdu. Mida 4aad: looma safri karo meel dhulka ka mida oo la aaminsan yahay inay fadli gaara dheer tahay meelaha kale oo ajarkeeda la laalaabay, oo aan ahayn sadexda masaajid, oo meel aan iyaga ahayn salaad looguma safri karo: masjidka Xaramka, masjidka Nabiga, masjidka Alaqsaa.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/10603>

